# Magacyadii loo aqoon jiray Dalkeenna Soomaaliy

(QEYBTII 2AAD) W.D. ADM. GAAS FAARAX AXMED CUMAR

Waxaan ku soo sheegnay Maqaalkii 1aad in ay ka mid ahaayeen Magacyadii loo aqoon jiray Dalkeenna Soomaaliya:-

1. Punt oo ka timid xagga Masar, socotana muddo dheer oo ku dhow inta aan la socdo 23Qarni, kuna soo dhawaatay dhalashadii Nabi Ciise (cs) (ilaa saddax qarni horteed); haddana waa la soo nooleeyey oo waa Punt-land (Waqooyi Bari Soomaaliya).

2. Funt (Phunt), asalkiisu wuxuu ka soo jeedaa YAHUUD, waxaanna ku soo tilmaannay inuu yahay isla Punt oo xoogaa la khalday dhawaqeeda, magacaani wuxuu xoog lahaa waqtigii xukunka Nabi Suleymaan (cs) qarnigii 10aad ee C.H.
3. Kuush oo ka yimid xagga Masar waxayna ula jeedaan dadyowga ku noolaa ka koonfur Masar, oo markii danbe lagu baahiyey Geeska Afrika, waana magac muujinaya midabka madow ama maariin. Waxaa xusid mudan in magacaani uu weli nool yahay oo dadyowga Geeska Afrika iyo waqooyigeeda waxaa ugu badan shucuubta ka soo jeedda kuwa kuushiitiga ah (Cushitic Race) oo Soomaalida ay ka mid tahay.

Maqaalka 2aad:

1. Magaca 4aad waa: Ethiopia, Magacani waxaa bixiyey Heridot, taariikhyahankii Giriigga qarnigii 5aad ee C.H. markii uu booqday Masar([1]).

2. Magacaani wax kale ma aha ee waa isla kii Kuush oo afka Giriigga ah, waayoo waa mid xambaarsan midabka madow.

3. Magacaani markiisii hore loolama jeedin dalka Itoobiya ee hadda jira ee waxaa loola jeeday dadyowga ku nool inta u dhaxeysa Webiga Niil iyo Badweynta

Hindiya. Magacaan Ethiopia wuxuu aad ugu dhegay ama ay ayagu ku dhegeen isuna aqoonsadeen wixii ka danbeeyay qarnigii 4aad ee C.D. Markii Dowladdii Aksiyuum (Axium) ee Ethiopia ay qaadatay Diinta Masiixiyadda oo Weliba uu soo gaaray kitaabka Diintaas oo lagu turjumay afka Giriigga oo lagu qoray Magaca Ethiopia halkii hore uu ugu ahaa Kuush([2]).

Wixii ka danbeeyay 1275kii([3]) markii qoyska Suleymaan uu xukunka ku soo noqday, dagaalna ay la galeen shucuubtii deriska la ahayd oy ugu horreeyeen saldanadkii islaamiga sida ilfaat, Cadal iyo 6da kale ee ka talineysay koonfurta HARAR iyo barigeeda … muddadaan dagaalka isballaarinta ay wadeen boqorradii Ethiopia (3qarni) waxaa aad u soo baxay magacaan oo noqday mid dowladi ay leedahay; magacaan wuxuu ku soo baxay khariidadii caalamka ee Potelmy Q.3aad ee C.H. oo ku fidisay dhulka hada loo yaqaan Ethiopia, Eriteriya, waqooyiga iyo bariga xeebta Soomaaliya; sidoo kale koonfurta Hindiya uu u bixiyey Ethiopianka bari([4]) sagaal qarni kadib waxaa soo dhawaaday soo bixitaankii DIINTA ISLAAMKA. Waxaa la daabacay horraantii kontomaadkii qarnigii 20aad ATLASKA taariikhda Islaamka oy qoreen Mr HARY iyo Mr Hazard, uuna ku turjumay af Carabi; MD I. Zaki (Qaahira1955), waxaa lagu muujiyey ATLASKA magacyada loo aqoon jiray meel kasta. Qarnigii 7aad ee Miilaadiga oo billawday markii Nabi Maxamed uu jiray 30sano, waa ka hor 10sano soo daahiridda Islaamka; khariidadii laga sawiray Geeska Afrika waxaa ku qornaa magaca Ethiopia dhulka hadda ee Eriteriya, Ethiopia iyo xeebta waqooyi iyo bari ilaa Qandala; waxaana lagu qoray hadalkaan: Ethiopia waa dal Masiixi ah. Xeebta u dhexeysa Qandala iyo Raas Caseyr, hoosna u sii socota xagga Hobyo waxay khariidada ku magacawday ZINJI, waana dal aan Masiixi ahayn. (arinta Zinji waan ku soo noqon doonnaa Inshaa allaah), intaan aan uga sinto magaca Ethiopia([5]).

Magaca 5aad AL – XABASHAH:

Magacaani waa mid mantaan la ah kii ka horreeyey ee Ethiopia, labadaan magac waxaa si isku mid ah isku macna ah loo isticmaali jiray 25qarni, walina way wada socdaan ayagoo labaduba ku baahsanayeen mandiqadda Geeska Afrika ugu danbeyntiina, waa hadee, waxay ku soo aruureen Dalka Ethiopiyada maanta loo yaqaan.

Magacaan asal ahaan wuxuu ka soo jeedaa galbeedka Yemen iyo Xijaas, waxaa la leeyahay in magacaani uu ka soo jeedo Qabiil Yemen ah oo la oran jiray Xabshat una soo haajiray galbeedka Badda Cas dhexbartankii kunkii sano ee ka horreeyey dhalashadii Nabi Ciise (cs)([6]) tan kale magacaan wuxuu matalaa wixii uu matali jiray magaca la mantaanka ah ee itoobiya oo xambaarsan midab madow, gaar ahaan kadib markii muhaajiriintii Yemen ay ku milmeen dadyowga hore u degganaa Dalkaa. Sidaas awgeed, macnaha magacaan waxaa lagu sheegaa dadyow isku dhafan. Si kooban ayaan u soo bandhigeynaa magacaan, si maqaalka uusan aad ugu dheeraan:

1. Kutubaha taariikhda ee ku qoran afka Carabiga kana hadla Geeska Afrika, gaar ahaan wixii ka horreeyey Qarnigii 18aad ee Miilaadiga waxay ku tilmaami jireen dadyowga maanta ku nool Geeska Afrika magaca Al- Xabasha([7]) sida:-

2. Markii Xabashida ay ku duushay Yemen qarnigii 6aad ee Miilaadiga oo ABRAHA hoggaamiye ka ahaa, wuxuu ku dhisay halkaas KANIISAD loo xajiyo si KACBADDA aan loo tagin([8]).

3. CABDIL MUTALIB (Nabiga Awowgiis) wuxuu la ganacsan jiray reer Yemen; laakiin walaalkiis Cabdi Shamas wuxuu la ganacsan jiray reer Xabasha([9]). a) Asxaabtii Nabi Maxamed (cs) waxay u haajirtay Xabashi, culumada qaarkoodna

waxay yiraahdaan Asxaabta waxay ka soo degeen Dekedda Zeylac (Zeylac = Xabasha)([10]).

4. Waxay qori jireen kutubihii hore ee taariikhda, Xabashidu waxay leedahay laba Dekedood oo kala ah: ADDOLIS (MASAWAC) iyo ZEYLAC([11]).

5. Atlas taariikhi ah ee soo baxay Qarniyadii dhexe wuxuu ku magacaabay Gacanka Cadmeed BADDA XABASHIDA, dekedaheedana wuxuu ku tirshay Mukalla (Yementa Koofur) iyo Salaala oo ka sii barrisan([12]).

6. Dadyowga Jareerta ah ee u badan Koonfurta Soomaaliya waxaa loo yaqaan Xabashi([13]), oo u muuqda in loola jeeday markiisii hore dadka dhulkaan Kuushiyiintu ugu timid.

7. Waqooyiga Soomaaliya waxaad maqleysaa kuwaani waa ilmo habar magaadley, kuwaanna waa reer habar Xubuusheed([14]).

8. Waxaa la sheegaa in ODAY Hawiye uu qabay xaas Carab ah iyo mid deegaanka ah (Xubuush)([15]).

9. Wuxuu qoray Al-Maqrizi: (Q.15aad) in Saldanada Xabashida ay ka mid yihiin: Cadal, Arabiini, Ifaat, Fatjaar, Dawaaro, Shawa, Baali, Hadya, Sharkha … Saldanada Muqdisho([16]). Tani waa caddeyn culus oo ka dhigeysa Muqdisho inay ka tirsan tahay dhulkii loo yiqiin Xabashi.

*FG: Waxaa xusid mudan in markii Burtiqeysku uu soo gaaray xeebaha Badda Cas Q.16aad wuxuu u aqriyey magacii Al- Xabasha: ABISIINIA, sidaas awgeed wixii ka danbeeyey waqtigaas (waa casrigii Dagaalkii Axmed Gurey) saddexdaan magac: Itoobiya, Xabashi iyo Abisinia waxay ku soo hareen dalka maanta loo yaqaan Ethiopia oo magaalo madaxdiisa ay tahay Addis Ababa.*

Xigasho:

*1. Will Diurant: History of Civilization Vol.1aad. (Ethiopia).*

*2. Mumtaaz al Carif: Al Xabasha (min Ma'rib ilaa Axium).*

*3. Asaga.*

*4. Will D. History of Civilization.*

*5. Waxaa daabacay maktaba al – Nahdah 1955 (Qaahira).*

*6. Mumtaaz al Carif: Al Xabasha.*

*7. Sida: Carab faqiih: Futuux Al Xabasha.*

*8. IBN AL ATHIIR: Al Kaamil Fii Al Taariikh.*

*9. Asaga.*

*10. Mumtaaz al Carif: Al Xabasha.*

*11. IBN Xowqal.*

*12. ATLASKA taariikhda ee Caalamka Islaamka Daar Al Fikri Al Carabi.*

*13. 13,14,15 arimo caan ku ah taariikhda Soomaaliyeed ee aan qorneyn.*

*16 . Dr Rajab Max'ed Cabdi xaliim: xiriirka siyaasadeed ee muslimiintii Zeylac iyo Misiixiyiintii Xabashida; Daarta Zeylac: Muqsidho 2014ka.*

# Taariikhda Ciidanka Badda:

Qaybtii Labaad

W.D. ADM GAAS FAARAX A. CUMAR

Waxaan ku soo sheegnay maqaalkii kowaad in ciidanka badda Soomaaliyeed la aasaasay 1950kii markii Talyaanigu uu abuurayey Ciidan Soomaaliyeed (Bolis iyo Milatari), waxay tiradiisu ahayd 40 badmaax, waxaana lagu magacaabi jiray Bolatone della Marina Milatare (Kooxda C.Badda). Howsha kooxdaani waxay ahayd maamulidda dekedaha, waxayna hoos imaan jirtay kolba wasaaraddii dekeduhu hoos yimaadaan ilaa Dec 1964kii oy kooxdii ku soo biirtay Wasaaradda Gaashaandhigga (X.D.S). Kooxdu waxay ka qayb gashay dagaalkii 1964kii oo waxay u xilsaarnayd wadidda doomanka ka gudbiya wabiga ciidanka iyo saadkiisa, gaar ahaan aagga Doolow.

Kooxdaan markii lagu soo wareejiyey X.D.S waxay lahayd HAL DHAMME (Khaliif Macow Xasan) iyo laba 2/xle (Max'ed Cismaan Xalane iyo Jeylaani Max'ed Nuur), waxayna kooxdu la wareegtay labadii markab ee nooga timid M.Sofiyet, soona gaartay Dekedda Berbera 10/2/1965tii, taariikhdaas oo loo aqoonsaday Maalinta C.BADDA Soomaaliyeed. Waxaa kale oon ku soo xusnay maqaalkii 1aad in 17sarkaal oo wax ku soo baratay Alixandaria (Masar) ay dalka soo gaareen 1965kii, waxaana ka mid ahaa X/le (Admiral) Max'ed Cumar Cismaan Taliyihii C.BADDA ee 1977-1981, 1984-86, iyo x/le Saciid Marino (Admiral) oo noqday Taliyihii C.BADDA 1987-1990kii.

Maqaalka 2aad

Maraakiibta imaaneysay waxay ahayd 6(lix) markab oo ah nooca xeeb – ilaaliyaha ah (XIL); sidaas awgeed waxaa loo baahnaa saraakiil leh takhasusyo kala duduwan

iyo badmaaxiin leh farsamooyinka heer dhexe; sida badmaridda (Navigation), Machanic, Isgaarsiin, Radar …IWM, oo ka shaqeysa maraakiibta iyo baraha isgaarsiinta iyo sahanka ee xeebaha. Sidaas awgeed waxaa Masar loo diray 1964tii 4 sarkaal oo ah badmarayaal, waxayna dalka ku soo noqdeen 1967dii, waxayna kala ahaayeen:-

1. X/le Muuse Saciid Max'ed (G)

2. X/le Cismaan Jibriil Xagar

3. X/le Aadan Kowti (G)

4. X/le kale

Sidoo kale waxaa 1965tii loo diray M.Sofiyet, Magaalada Booti (Poti) ee Badda Madow; koox ahayd S/xigeen iyo badmaaxiin si ay u soo bartaan farsamada dhexe, muddo sanad waxbarasho ah; waxayna dalka kusoo noqdeen 1966dii, waxaana loo kala qeybshay maraakiibtii oo dalka soo wada gaartay iyo Barihii ilaalada xeebaha (BIB).

Waxaa kale oo loo diray M.Sofiyet isla 1965tii, waxna ku bartay Magaalada Baku (Magaalo madaxda Azerbayaan) 3(saddex) sarkaal oo ah heer Injineer Navigation (5sano) waxayna dalka kusoo noqdeen 1970kii; waxayna kala ahaayeen:-

1. 2X/le (Inj) Axmed Xaaji Cumar (G)

2. 2X/le (Inj) Mowliid Xasan Faarax (G)

3. L/S la oran jiray HURRE (G) oo la soo celiyey 1967dii, markii uu diiday inuu ka qeybgalo duruusta shuucinimada uu ku sheegay iney ka soo horjeedo Islaamka uu aaminsan yahay.

4. Sidoo kale waxaa loo diray M.Sofiyet isla 1965tii 6 L/S oo heer Injineer ah waxayna wax ku barteen magaalada Liningaraad, waxayna dalka ku soo noqdeen 1970kii; waxayna kala ahaayeen:-

5. 2xlle Inj Faarax Gurxan Cali (Matoriste)

6. 2x/le Ing Cabdi Yuusuf (Matoriste)

7. 2x/le Ing Cabdi Eelaay (Raadar)

8. 2x/le Ing Cab/hi Max'ed Cabdi "Farabadne" (Raadar)

9. 2x/le Ing Cumar Nuur Max'ed (Radio)

10. 2x/le Ing Cabdullaahi Ilfuur (Radio)




**Midig Gadaale Saraakiisha:**

1-Inj. Cabdi Yuusuf 4- Inj. Cumar Nuur
2- Inj. Axmed Xaaji 5- Shafeec Xirsi Cumar
3- Inj. Cabdi Eelaay 6- Muuse Saciid
Safka hoose waxan kuso xusnay Maqaal L.1

Waxaa kale oo loo diray M.Sofiyeed 1966kii, waxna ku soo bartay magaalada BAKU, dalkana ku soo noqdeen 1968kii, 10 L/S oo soo baranaayey Difaaca Xeebaha (Coastal Guard); waxayna kala ahaayeen, ayagoo isugu xiga sida Darajada qalin jebintu ahayd:-

1. Xlle Faarax Axmed Cumar (QORAHA).

2. X/le Cab/hi Cali Nuur (G).

3. X/le Max'ed Max'ud Saacid (G).

4. X/le Xuseen Macallin Daahir (G).

5. X/le Axmed Max'ed Ciise "Dhala cadde" .

6. X/le Max'ud Sh. Yuusuf (G).

7. X/le Muuse Ciise Waaberi (G).

8. X/le Cab/hi Cali Cigaal (G).

9. X/le Cab/hi Cabdi Yuusuf (G).

10. X/le Max'ed Bootaan Cawl.

Tobankeennii waxaa na loo kala baddelay XAMAR iyo BARBARA, ayadoo loo kala magacaabay taliyaha D.Xeebaha ee Xamar Xle Faarax Axmed, taliyaha Barbarana X/le Cab/hi Cali Nuur; taliye x.g. Xamar X/le Saciid, taliye x.g. Barbara x/le Xuseen M. Daahir, waa sida loo kala helay Darajada Qalinjebinta. Waxaa nagu guruub ah (1966) Shafeec Xirsi Cumar (SAAD: ODESA).




**Saraakiishii Difaaca Xeebaha ee 1966dii:**

**Midig taagan:**

1- Cab/hi Cali Nuur

2- Macallimadii Afka

3- Max'ud Sh. Yuusuf

5- Axmed Dhala Cadde

6- **Midig Fadhi:** Faarax (Qoraha)

7- Cab/hi Cali Cigaal

1967dii waxaa loo diray M.Sofiyet 2L/S oo la baray Difaaca Xeebaha waxayna kala ahaayeen: Max'ed Xasan Axmed (G) iyo Muuse Cumar Cali (G); waxayna soo noqdeen 1969kii.

Laga billaabo 1965 ilaa Kacaankii 21/10/1969kii; C.BADDU wuxuu dhisay:-

1. 3 Saldhig oo kala ah: Muqdisho, Berbera iyo Kismaayo.

2. 13 Bar ilaalo (BIB) oo lagu dhisay: Seylac, Bulxaar, Berbera, Boosaaso, Caluula, Hobyo, Cadale, Muqdisho, Marka, Baraawe, Kismaayo, Buurgaawo iyo Raas Kiyaanbooni.

3. Hal Dugsi farsamo oo ku yiil Xamar.

4. 6 Markab (XIL) oo lagu kala qeybiyey 3da Saldhig.

5. 2 Horin Madaafiicda Xeebta oo ilaalisa Dekedaha Muqdisho iyo Berbera.

F.G: Bar Ilaalo kasta waxay ku qalabeysneyd:-

2 Radio HF, 1 Radar (Distance = 100 NM).

1-2 gaari, Qalabka Hawada lagu cabiro iyo 30 badmaax.



**Fadhiya Midig:**
1-Ing. Cabdi Eelaay
2-Faarax (Qoraha)
3-Cabdir Cadde Muunye
4-Taliye: Max'ud Geele
5-Cab/dir Kheyre
6-Ing. Cumar Nuur




**Midig taagan:**

1- Muuse Ciise Waaberi 2- Faarax (Qoraha)

3- Inj. Cab/hi Farabadane 4- Aadan Waqaf(1967dii)

**Midig fadhiya:** 1-Yuusuf Malaaq, 2- Xuseen Macalin Dahir

3- Cab/hi Cali Cigaale.



*Waa hubkii iyo qalabkii difaaca xeebaha oy ka shaqeyn jireen saraakiisha (Dufcadii) 1966dii uu horjooge u ahaa X/le Faarax (Qoraha).*




**Midig:**

1-Axmed Daala-Cadde 3- Faarax (Qoraha)

2- Max'ed Xasan Axmed 4- Max'ed Bootaan Coowl

# Qeybtii 2aad ee Qaanuunka Badda Soomaaliyeed

W.Q. ADM GAAS Prof Faarax Axmed Cumar (Faarax Qare)

Qaanuunkaani waa midka rasmiga ee Badda ee dawladda somaaliya wuxuna soo baxay 1989kii waxaana la waafajiyay heshiiska (Qaanuunka) badda ee caalamiga (UNCLOS) ee soo baxay 10 dec 1982, Dowladda Soomaaliyana ay ka mid tahay saxiixayaashiisa, Baarlmaankii Soomaaliyeedna ogalaaday, Madaxweyne Maxamed Siyaadna uu ku soo saaray Decree 9/2/1989.

Sharcigan Badda ee dalka waxaan kasoo qaadanaeynaa macluumad guud ee u gaar ah kuna saabsan Badda Dalka.

1- Xarriiqinta Asaasiga: waa halka ay gaaraan biyaha baddu markii hirku gadaal u noqdo, waa hadii ay xeebtu ay toosan tahay. Hadii kale waxaa loo qaadanayaa xarriiqinta asaasiga xariiqmo toosan oo xariiriya raasaska (madxaha) xeebta (dhulka badda gala). (Q. 4aad, F.1aad), Q. 5,14,16 ee UNCLOS.
2- Biyaha Gudaha: waa biyaha badda, laashashka, wabiyada badda ku darmada, dekedaha, kuna dhaca xaga dambe ee xiga berriga ee xariiqinta asaasiga (Q.5aad) Q8aad ee UNCLOS).
3- Biyaha Qaranka (territorial water), ballacoodu waa 12 M.B. (Miil Badeed = N.M. Neutical mile) = 22 KM oo ka billaabata xarriiqinta asaasiga, (Q. 4aad, F 3aad), Q.3 ee UNCLOS.

   F.G. Biyaha gudaha iyo Biyaha Qaranka Dowlada Soomaaliyeed waxay ku leedahay awood buuxda: Hawadeeda, Biyaheeda iyo Biyaha hoostooda iyo Dulka ka sii hooseeya (Q. 4aad F. 4aad).

4- Biyaha Xiga: (Contiguous Zone), waa ballac ah 12 M.B., wuxuuna gaarayaa ilaa 24 M.B oo ka billaabata xarriiqinta asaasiga ah (Q. 6aad, F. 4aad), Q.9aad ee UNCLOS.

   J. Soomaaliya waxay kontarool iyo fulin ku sameyneysaa shuruucda canshuuraha, socdaalka, ka hortagidda wasakheynta iyo caafimaadka (Q.6aad), Q. 33aad ee UNCLOS.

5- Qeybta dhaqaalaha ee gaarka ah: EEZ (Exclusive Economic Zone). Waxay gaareysaa ilaa 200 M.B. oo ka soo bilaawata xariiqinta asaasiga ah (Q. 7aad, F. 1aad), Q. 55-65, 87-115 ee UNCLOS. J Soomaaliya waxay xuquuq buuxda ku leedahay EEZ keeda kheyraadka nool iyo kan aan nooleyn ee biyaha, biyaha hoostooda iyo ka sii hoos (Q. 7aad, F. 2aad).

6- Dagaandegga Hoose (Continental Shelf): wuxuu balac ahaan gaari karaa ilaa 350 M.B. oo ka billaabata xarriiqinta asaasiga. Q 76-85 ee UNCLOS. J. Soomaaliya waxay xuquuq buuxda ay ku leedahay ka faa'ideysiga dhammaan kheyraadka badda nool iyo kan aan nooleyn ee degaandeggeeda badda (Q. 8aad, F. 1,2aad).

7- Jasiiradaha ku yaal Xeebaha: haddii ay ku yaalaan meelo aan ka fogeyn xeebta 12 M.B waxay yeelanayaan Biyo Qaran (territorial water). Waxayna ka billaabaneysaa xariiqinta asaaska ah ee jasiiradda kuna dhacda dhinaca badda. Q. 13aad ee UNCLOS.

8- Dhul badeedka ku yaala xagga barriga ee xeebta: wuxuu ka tirsan yahay badda, dhumuc ahaan= 450 (afar boqol iyo kontan) mitir oo ku dhirirsan xeebta (Q.10aad,) maamulkii-sana waxaa leh Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha: (Q.11aad).

9- Kheyraadka badda kuwooda nool (Kalluun): waxaa loo baahan yahay in si aqligal ah loogu faa'ideysto, lana tilmaamo inta ugu badan ee laga guran

karo nooc kasta si loo ilaaliyo inaysan dabar go'in, gaar ahaan kuwa nuujiya ilmahooda, qubada I.W.M. (Q.61aad – Q69aad ee UNCLOS).

10- Xuduudaha Badeed ee laba Dowladood oo Daris ah isku hayaan sida: Soomaaliya iyo Kenya. Waa xarriiq toosan oo aadeysa xaga badda oo labada dhinac wax u simeysa, Q.15aad ee UNCLOS; waxaana lagama maarmaan ah in Dowlad kasta ku qorto xudduudeeda badeed (Qaab Coordinate ah) una gudbiso Xoghayaha Guud ee Q.M. si loo wada ogeysiiyo Dowladaha Caalamka, Q.16aad ee UNCLUS. Hadii labada Dowlad ay isku soo horjeedaan, biyaha u dhaxeeyana aysan gaareyn 400 M.B., sida gacanka cadmeed ee u dhaxeeya Yamen iyo Somalia, xuduudda labada Dowladood waxay noqoneysaa xariiqin wax u simeysa oo marta dhexbertanka badda u dhexeysa. Laba Dowladood. (Isla Qodobkii hore). Hadii labada Dowladood ay ku heshiin wayaan xuduuddooda waxaa u go'aaminaya maxkamadda caalamiga ah; sida hadda u socota Soomaaliaya iyo Kenya.

11- Qaanuunkeenna baddu: wuxuu nidaamiyaa badmaridda maraakiibta, dadka iyo badeecada saran iyo wixii dhibaato ah oo ka imaan kara iyo xadkooda sidoo kale dekedaha iyo maamulkooda. (Buugga 1aad – Buugga 5aad ee Qaanuunka Badda).

12- Wasakheynta Badda: ayuu Qaanuunku ka hadlay iyo sida looga hortegi karo (Buugga 6aad).

13- Maamulka Badaha Dalka: waxaa iska leh Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha ee J.F.S, (Buugga 2aad).